Portland Public Schools 2020 FALL Reimagining Education During the Pandemic

# Dayrta 2020: Wararkii u dambeeyey Ogosto 28

**Ogosto 28, 2020**

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Iyada oo aan ku jirno diyaargarowgii sanad-dugsiyeedka 2020-21 sidii loo bilaabi lahaa, waxaan idiin haynaa warar cusub oo kooban iyo fariimo xusuusin ah oo aan fileyno inaad hesheen bilowgii todobaadkani. Sidii caadada ahayd waxaad booqan kartaa pps.net/fall2020 si aad u hesho wararkii ugu dambeeyey iyo agabyadaba.

Sida aad ka warqabtaan, tilmaamaha soo socdo ee la raacayo madaxda caafimaadku soo jeedinayaa iyo tilmaamaha waxbarashada Guddoomiyaha Gobolka Brown waxay noqon doonaan kuwa aad ka heli doontaan online maalinta ugu horeysa ee iskuulka oo ah Sebtembar 2deeda, ilaa ugu yaraan Noofembar 5teeda. Waxaan sii wadi doonaa inaan idiin soo dirno wararka cusub todobaadkiiba. Iyada oo aan ku soo dhawaaneyno maalintii ugu horeysay ee iskuulka oo ah maalinta Arbacada ee soo socota, waxaan idinla wadaagi doonaa warar muhiim ah, macluumaad aad lagama maarmaan ah oo ku saabsan sidii aad ilmahaagu u bilaabi doono iskuulka oo la soo marin doono meelo kala gedisan, oo ay ka mid yihiin in laguugu soo diro iyaga oo email ah,fariimaha degdega ah. **Haddii aad dooran in aad hesho fariimaha degdega ah ee ka imanaya Isgaarsiinta PPS, waxaad soo diri kartaa fariin "Haa(YES) Maya "Y" iyo 68453.** Fadlan waxaad ogaataa in Isgaarsiinta PPS fariimaha degdega ay soo diraan ay yihiin kuwa waqti kooban.

---

Waxaan ku faraxsanahay inaanu todobaadka soo socda ardaydii ku aragno(muuqaal)!  Bilowga sanad-dugsiyeedka waxaa dhici karta in waxoogaa culus yeesho marka la eego xaaladaha caadiga ah, iyada oo aan ogsoonahay cudurka faafaya macnihiisu inay tahay waxyaabo dheeraad ah oo aynaan ogeyn sidii aan wax uga ogaan lahayn sanadkani, oo ay ka mid yihiin teknoolajiga.

Waxaan dhammaan ku martiqaadeynaa qoysaska inay soo booqdaan pps.net/fall2020 sidii ay uga heli lahaayeen tiro fiidiyaal ah oo wacyi-galin ah iyo agabyo kale, iyaga oo lagu turjumay luqadaha lagaga hadlo dugsiyada degmada, sidii lagaaga caawin lahaa inaad fahamto qaabka iyo qalabka wax lagu baranayo ee ardayda iyo macallimiintu isticmaalayaan xillilga dayrta. Waxaad sidoo kale heli dooontaa macluumaad marka aad gasho barnaamijyadani, sida loo halo internet iyo tusaalooyin kale oo idin caawinaya.

Haddii qoys ahaan ama ardaygaagu wali dhibaato ka haysato dhinaca barashada teknoolajiga, waxaan rajeyneynaa in aad soo wici doonto xafiiska Gargaarka Teknoolajiga ee PPS, oo furan laga bilaabo 7:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabtii, maalmaha iskuulku furan yahay. Waxa aan ka jawaabi doonaa su'aalahaaga iyada oo aan kula wadaagi doono macluumaad iyo tusaalooyin kaa gargaaraya arrimaha la xiriira qalabka

waxbarashada guryaha lagu qaadanayo. Xafiiska Gargaarka Teknoolajiga waxaa laga heli karaa dhammaan luqadaha PPS ee la gargaaro. Waxaad u soo diri kartaa Email support@pps.net ama waxaad soo wici kartaa teloonada hoos ku qoran:

- English: 503-916-3375
- Español: 503-916-3582
- 中文：503-916-3585
- Tiếng Việt: 503-916-3584
- Soomaali: 503-916-3586
- Русский: 503-916-3583

Isbedelka kaliya ee ay ardaydu ka dareemi doonaa PPS HD ee gu'gii la soo dhaafay waxa weeyey: iskuulada iyo ardaydu waxa ay u ogolaan doonaa inay isticmaalaan Zoom inta ay waxbarashada ku jiraan maalintii. Google Meet isaguna wali waa ay isticmaali karaan iyada oo macallimiintu sii wadi doonaa inay qalabkani isticmaalaan. Doorashada la kala dooranayaa waxa loo deynayaa macallinka kii ay ku isticmaalayaan fasalka ay casharada muuqaalka ah uga gudbinayaan ardayda.

Waxaan jecelnahay in aanu idin xasuusino inay ka go'an tahay Dugsiyada Dadweynaha Portland inay dhammaan ardayda waxbarashada ku siiyaan jawi waxbarasho oo nabad ah. Ma jiri doonto macluumaad shaqsi oo ku saabsan ardayda oo lala wadaagi doono ama heli doonaan wax ka baxsan bulshada waxbarashada. Inkastoo casharada online ah la duubi doono sidii ay fursad barasho ugu noqota ardayda, macallimiintu waxa ay ilaalin doonaa macluumaadka shaqsiga si aan cidina u helin inta la duubayo casharadan. Ardayda kaga qeybqaadanaya online iyo shaqada ay qabanayaan waxaa si dhow isha uga haynaya macallinka loo xilsaaray. Waalidiintu sidoo kale waa in ay la socdaan oo isha ku hayaan waxyaabaha casharada online iyaga oo ay tahay inay heli karaan dhammaan ayna haystaan magaca lagu galayo iyo furaha sirta ah ee lagu galo ee koontada ardaydooda

Habeenimadii Tallaadadii, Madaxa Iskuulada, Dr. Shawn Bird wuxuu soo bandhigay Golaha Waxbarashada muunad jadwalada waxbarashada. Halkani waxaad ka heli kartaa jadwaladii iyada oo aad ka heli doonto jadwalada gaarka ah ee maamulaha iskuulka ardaygaaga.

Waxaan idin xusuusineynaa in labadeena todobaad ee iskuulka ugu horeeya (Sebtembar 2-11) waxa la socon doona "soft start" jadwalo diirada lagu saarayo sidii la isku xirnaan lahaa, kuwaasi oo laga heli karayo marka aad gujiso halkan.

Waxa aan ka warqabnaa in ardaydu tababarayaasha iyo qoysasku isweydiinayaan sida ay suurtagal u

tahay in lagu noqonayo ciyaarihii. Waxa aan dadaal ugu jirnaa sidii aan go'aan uga gaari lahayn marka si nabadgelyo ah qaab masaafad la isku jirsanayo tababaradii ciyaaraha ee bannaanka lagu qaadanayo u noqon lahaayeen tallaabada koowaad. Waxa aan rajeyneynaa in aan helmo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan todobaadka soo socda. Waxa aan sidoo kale idinla socodsiin doonaa wararka cusub sida ugu dhakhso badan qorshayaasha fursadaha koox ay ka shaqeynayaan oo dhismayaasha iskuulada ah waqtigani dayrta ah, marka laga doogo xanuunka COVID-19 waxa aan caddeyn doonaa dariiqyo aan raacayno sidii looga nabageli lahaa kuwaasi oo ah tilmaamaha ay Waaxda Waxbarashada Oregon soo jeediyaan. Inta lagu gudo jiro qorsheyntani, waxa aan mudnaanta siin doonaa caafimaadka iyo fayo-qabka ardaydeena iyo shaqaalaha.

Ugu dambeyn, waxa aan idinla wadaagi doonaa liisto dhammeystiran oo ardayda iyo waxyaabaa qoysaska laga taageerayo horaanta todobaadka soo socda. Tani waxaa ku jira addeeg dhammeystiran iyo barnaamijyada la jaanqaadaya dhaqanka bulshooyinka. Addeegyadani iyo barnaamijyada waxbarashada ee laga taageerayo iyo kobcinta lagu ballaarinayo barnaamijyada maalintii, taageerida bulsho ahaan iyo shuruucba iyo waliba taageerida agabyada qoyska. Liisto dhammeystiran, kuna salaysan iskuulada kasta taasi oo ah ikhtiyaari ah, waxa ay ku salaysnaan doonaan iyada oo aan idiin soo diri doona maalinta Tallaadada ee todobaadka soo socda.

Xaggaagani wuxuu ahaa mid mashquul badan, iyada oo sida aan ognahay aynu la kulanay caqabado fara badan. Maadaama uu bilowga sanad-dugsiyeedkani noqon doono mid ka gedisan kuwii hore, waxaan aad u rajeyneynaa inaad ka shaqeyneyno sidii aan iskugu xirnaan lahayn ardayda todobaadka soos ocda. Waxaaan idiin rejeynaynaa nasasho wanaagsan.